FORWARD TOGETHER

# Agabyada Casharada ee Cusub

## Ku Laabashada Dugsiga 2021/2022

**Guud mar:** Afarta sanno ee soo socoto, Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay u soo iibsan doonaan dhammaan fasalada K-5 agabyo casharo oo cusub sida (manhaj, buug, qalabyo ardayda lagu fahamsiiyo xisaabta, agabyo dijital ah, iwm.). Warsidahani wuxuu idin siin doonaa wixii cusub ee agabyo casharo waxbarasho, iyo fursadaha aad kala soconeysaan qalabyadaasi idinka oo wixii warcalin ka sameyn doona.

### Xisaabaadka K-5

Laga bilaabo dayrtani, ardayda iyo macallimiintu waxa ay isticmaali doonaa manhaj cusub oo xisaab ah kaasi oo la yiraa Xisaabta Diyaarka ah( Ready Math). Sagaalkii bilood ee la soo dhaafay, iyada oo lagu eegey muraayadaha sinnaanta,



Maamulayaasha PPS, macallimiinta iyo shaqaaluhu waxa si xilqaan leh uga shaqeeyeen qiimeynta, tijaabinta goobta lagu sameynayo ayaa ugu dambeyntii Dugsiyada Degmadu waxay agabka cusub ee casharada K-5 u doorteen inuu noqdo Xisaabta Diyaarka ah. Dhammaan qalabkani waxaa lagu turjumay luqadaha Isbaanishka, Ruushka, Shiinaha la fudeydiyey, Jabaaniiska iyo Fiitnaamiska.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan kala xiriir Patrice Woods ee pwoods@pps.net.

### Xirfadaha Aasaasiga u ah K-3

Labadii sanno ee la soo dhaafay PPS waxa ay imtixaano ku qaadayeen goobaha iskuulka iyaga oo soo bandhigaya(Aasaaska) Fundations. Sanad-dugsiyeedka 2020/2021, fasalada K-1st waxaa loo qeybinayaa



Aasaasiga(Fundations), iyada oo sanad-dugsiyeedka 2021/2022, fasalka 2aad iyagana loo qeybin doonaa(Aasaasiga) Fundations, iyo fasalka 3aad oo iyagana lagu sameyn doono tijaabada Aasaasiga ah ee goobta iskuulka lagu qaadayo .

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xariir Emma Wang ee hwang@pps.net.

### Bani'aadanimada K-5

Sanadkii 2021, PPS waxa ay qandaraas la gashay The Oregon Historical Society (OHS) sidii loo cusbooneysiin lahaa daabacadii 1992 ee magaalada "Portland, Bulshadayada: Akhriska Caruurta". In dib loo qaabeeyo daabacada waxa ay caawin doontaa iyada oo la jaanqaadeysa Cilmiga Bulshada Oregon, Luqada Ingiriiska, iyo Heerarka Barashada Anshaxa sidoo kale Duruusta Dugsiyada Lagu Qaato ee Salka u ah Manhajka. Afarta daabacadood waxaa ka mid noqon doona: "Portland Waxay Noqotay Magaalo", Afarta, "Taariikhda Laga Qorey Portland", laga soo bilaabo waqtigii waayaha magaalada ee bilowgii ilaa maanta", iyo Raad reebka iyo sheekooyinka Portland. Dugsiyadu waxa ay bilaabi doonaan inay dhigaan daabacadahani inta lagu jiro sanad-dugsiyeedka 2022/2023.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xariir Emma Wang ee hwang@pps.net.

### Waxbarashada Labada Luqadood Wax Lagu Bartay ee Isbaanish Fasalada K-5 (DLI)

Guddidii dib u eegista ee ka koobneyd wakiilada dhammaan 10-ka branaamij ee Isbaanishka markii la qiimeeyeen, iyada oo Golaha Waxbarashaduna ansixiyey iyaga oo doortay manhaj cusub Isbaanishka lagu dhigayo kaasi oo maxsuulka ka soo baxaya la filayo inuu noqdo mid aad u horumarsan- Benchmark Adelante/Advanced. Agabka waxbarashadu waa mid la jaanqaadaya sida uu u dhan yahay Luqada Ingiriiska iyo Waxbarashada Isbaanishka Lagu diyaariyey ee Heerarka Gobolka, waxayna u addeegsan doonaan sidii loogu badhxi lahaa Luqada Ingiriiska, Barashada Bulshada, Sayniska, Barashada Shucuurta Bulshada iyo qaab ka jawaabaya habka wax loo barbaariyo dhinaca habdhaqanka waxbarashada.




Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xariir Emma Wang hwang@pps.net.

Macluumaadka guud ee sida loo qabatimayo, fadlan la xiriir Mary Wiener ee mwiener@pps.net

FORWARD TOGETHER PPS

# Agabyada Casharada ee Cusube

## Ku Laabashada Dugsiga 2021/2022

**Guud mar:** Afarta sanno ee soo socoto, Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay u soo iibsan doonaan dhammaan fasalada 6-8 agabyo casharo oo cusub sida (manhaj, buug, qalabyo ardayda lagu fahamsiiyo xisaabta, agabyo dijital ah, iwm.). Warsidahani wuxuu idin siin doonaa wixii cusub ee agabyo casharo waxbarasho, iyo fursadaha aad kala soconeysaan qalabyadaasi idinka oo wixii warcalin ka soo bixisaan

| | | |
|---|---|---|
| **Saynis 6-8** |  Gu'gii sanadka 2021, macallimiinta sayniska dugsiyada dhexe iyo maamuladu waxa ay soo jeediyeen in la qabatimo qalabka sayniska ee daabacada 3aad SEPUP, taasi oo la jaanqaadeysa Heerarka Sayniska Jiilka Soo Socda(NGSS). Cusbooneysiinta SEPUP 3 waxay xaqiijineysaa in dhammaan ardaydu bartaa cutubyo isku mid isla waqti kaliya. Qalabkan cusub iyo qalabyada la soo qaybin doono xilliga dayrta. | Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xariir Susan Holveck ee sholveck@pps.net. |
| **Cilmiga Bulshada 6-8** | Inta lagu gudo jiro sanad-dugsiyeedka 2021/2021, tiro macallimiin/dugsiyo ayaa lagu tijaabin doonaa goobta agabayada casharada Cilmiga Bulshada ee cusub. Macallimiinta/dugsiyada waxaa la shaqaaleysiin doonaa bisha Sebtamber 2021. Wixii macluumaad dheeraad ah soo baxana waa la idinla socodsiin daanaa. Waxaa lagu martiqaadi doonaa Qoysaska/Daryeelayaasha/Ardayda/Fursadaha Ka Qeybgalka Bulshada, qalabyada tijaabada goobta ayaa iyaguna soo raaci doona. | Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir Emma Wang ee hwang@pps.net. |
| **Luqada Ingiriisida 6-8** |   Xilliga gu'ga 2021, koox kooban oo macallimiinta fasalada 6-8 ee Luqada Ingiriiska ayaa akhriyi, dib u eegis ku sameyn ka dibna waxa ay dooran doonaan buugta suugaanta ee sheekooyinka ah. Buugaagtaasi waxa ay iman doonaan dayrta 2021. Buug sheekooyin ah oo dheeraad ah ayaa la diyaarin doonaa sanadaha soo socda. Cinwaanada buugaagtaasi waxaad ka heli halkan. | Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir Emma Wang ee hwang@pps.net. |
| **Luqadaha Dunida 6-12** | Luqada Dunida (WL) waxaa goobta lagu tijaabin doonaa saddex Goob Tijaabin oo kala gedisan ee agabyada luqada Isbaanishka iyada oo bilaabmi doonta Dayrta 2021. Haddii mid ka mid ah agabyada la doorto, waxaa dugsiyada degmada loo qeybin doonaa sanad-dugsiyeedka 2022/2023. Intaa waxaa dheer, Luqada Dunida(WL) waxaa lagu siin doonaa agabyo cusub oo dijital ah sidii uga siin taageeri lahaayeen casharadooda. Waxaana ka mid ah Buugaag Cod ahaan Loo Duubay ee Isbaanishka, Faransiiska, Jarmalka iyo Carabiga. | Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir Emma Wang ee hwang@pps.net. |
| **Xisaabta 6-12** | Dabayaaqada xilliga gu'ga 2021,gudidda macallimiinta xisaabaadka fasalada 6-12 iyo maamulayaashau waxay waraysteen ka dibna qiimeyn ku sameeyeen agabyada casharada xisaabaadka shirkadaha iibineysa buugtaasi. Iibiyaashaasi buugaagta, labo buugaagta casharada xisaabaadka fasalada 6-8 ka mid ah ayaa laga doortay in lagu sameeyo tijaabada goobta inta lagu gudo jiro sanad-dugsiyeedka 2021/2022. Haddii mid ka mid ah laga doorto, waxaa dugsiyada degmada loo qeybin doonaa sanad-dugsiyeedka 2022/2023. Martiqaad ayaa loo fidin doonaa Qoysaska/Daryeelayaasha/Ardayda/ Fursadaha ka qeybgalka Bulshada, qalabyada tijaabada goobta ayaa iyaguna soo raaci doona. | Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir Kristina Howard ee khoward3@pps.net. |

Wixii macluumaadka qabatinka ah, fadlan kala xiriir Mary Wiener ee mwiener@pps.net

# Agabyada Casharada ee Cusube

## Ku Laabashada Dugsiga 2021/2022

**Guud mar:** Afarta sanno ee soo socoto, Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay u soo iibsan doonaan dhammaan fasalada 9-12 agabyo casharo oo cusub sida (manhaj, buug, qalabyo ardayda lagu fahamsiiyo xisaabta, agabyo dijital ah, iwm.). Warsidahani wuxuu idin siin doonaa wixii cusub ee agabyo casharo waxbarasho, iyo fursadaha aad kala soconeysaan qalabyadaasi idinka oo wixii warcalin ka soo bixisaan

### Luqadaha Dunida 6-12

Luqada Dunida (WL) waxaa goobta lagu tijaabin doonaa saddex Goob Tijaabin oo kala gedisan ee agabyada luqada Isbaanishka iyada oo bilaabmi doonta Dayrta 2021. Haddii mid ka mid ah agabyada la doorto, waxaa dugsiyada degmada loo qeybin doonaa sanad-dugsiyeedka 2022/2023. Intaa waxaa dheer, Luqada Dunida(WL) waxaa lagu siin doonaa agabyo cusub oo dijital ah sidii uga siin taageeri lahaayeen casharadooda. Waxaana ka mid ah Buugaag Cod ahaan Loo Duubay ee Isbaanishka, Faransiiska, Jarmalka iyo Carabiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir Emma Wang ee hwang@pps.net.

### Xisaabta 6-12

Dabayaaqada xilliga gu'ga 2021,gudidda macallimiinta xisaabaadka fasalada 6-12 iyo maamulayaashau waxay waraysteen ka dibna qiimeyn ku sameeyeen agabyada casharada xisaabaadka shirkadaha iibineysa buugtaasi. Iibiyaashaasi buugaagta, labo buugaagta casharada xisaabaadka fasalada 9-12 ka mid ah ayaa laga doortay in lagu sameeyo tijaabada goobta inta lagu gudo jiro sanad-dugsiyeedka 2021/2022. Haddii mid ka mid ah laga doorto, waxaa dugsiyada degmada loo qeybin doonaa sanad-dugsiyeedka 2022/2023. Martiqaad ayaa loo fidin doonaa Qoysaska/Daryeelayaasha/Ardayda/ Fursadaha ka qeybgalka Bulshada, qalabyada tijaabada goobta ayaa iyaguna soo raaci doona.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir Kristina Howard ee khoward3@pps.net.

Wixii macluumaadka qabatinka ah, fadlan kala xiriir Mary Wiener ee mwiener@pps.net